

Si wadajir ah aan ula dagaalno Koronaha

Ilaali in aad dadka isku jirsataan masaafu badbaadada lagu ilaaliyo, nadiifi qacmahaaga marar badan, xasuuso qaabka qufacca ee nadaafadda lagu ilaalinayo waxaanad isticmaashaa afshareer. Haddii ad leedahay calaamadaha xanuunka, isla markaasba baadhitaan iska soo qaad. Ha tagin shaqada, iskoolka, goobaha hiwaayadda ama makhaayadaha. Iska ilaali xidhiidhka wadajooga ah ee dhow illaa aad ka helayso natiijada baadhitaanka.



Guriga iyo Munaasabadaha gaarka ah

Xaddib la kulanka kaliya dadka kuu dhow. Ha qabanqaabin xafladdo ama munaasabadaha gaarka ah. Haddii aad leedahay xataa calaamadaha xanuunka oo yar, isla markaasba baadhitaan iska soo qaad. Ilaali nadaafadda wanaagsan ee gacmaha iyo qaabka quficidda ee nadiifta ah.



Gaadiidka dadwaynaha

Haddii ad awooddo, iska ilaali wakhtiyada dadku badanyihiin. Isticmaal af-shareerka.



Dukaamada iyo suuqyada

Isticmaal af-shareer, xasuuso in aad dadka isku jirsataan in badbaadada lagu ilaalinayo. Markaad soo galayso iyo marka ad ka baxayso isticmaal dawada gacmaha jermiska lagaga dilo.



Goobaha shaqada

Haddii ay suuro gal tahay, shaqada aanan xafiiska la la tagayn ee guriga lagu qabanayo samee. Xasuuso in aad dadka isku jirsataan masaafu badbaadada lagu ilaalinay, iskana ilaali xidhiidhka wadajooga ah ee dhow iyo isticmaal af-shareerka.




Xannaano-maameedyada

Isticmaal af-shareerka marka ad Imahaaga xannanada keenayso ama ka kaxaynayso.



Iskooladda iyo xarumaha waxbarashada

Xasuuso in aad dadka isku jirsataan masaafu badbaadada lagu ilaalinay iyo nadaafadda gacmaha. Ku isticmaal dugsiyada dhexe af-shareerka. Dugsiyada sare, iskuulaadka xirfadaha, jaamacadaha iyo kansalaisopisto waxay u wareegeen waxbarashada guriga ama iskoolka kabaxsan.



Makhaayadaha

Xasuuso in aad dadka isku jirsataan masaafu badbaadada lagu ilaalinay iyo nadaafadda gacmaha. Wakhtiyada furnaanshaha iyo wakhtiyada khamriga la iibiyo iyo sidoo kale macaamiisha tiradooda waa la xadeeyay.



Goobaha dadka ka dhaxeeya ee gudaha lagu jiro

Musiyumyada, xarumaha dhaqanka iyo xarumaha dhalinyarada ayaa la xiray. Isticmaalka maktabyada ayaa xaddidan. Maktabyada ku isticmaal af-shareerka.



Hiwaayadaha (isboortiga)

Xaruumaha gudaha isboortiga ee magaalada waa la xiray. Dhamaan isboortiga gudaha ayaa la joojiyaya iyo sidoo kale isboortiga banaanka dadka da' da 20 sano ka wayn.



Dhacdooyinka dadweynaha (isboortiga, dhaqanka iyo munaasabadaha kale)

Dhacdooyinka dadwaynaha waa mamnuuc gudaha iyo bannaanka. Marka laga reebo kuwa sharci ah iyo shirarka sharciga joojtada ah. (waxaa lagu xadeeyay 10 qofood).



Adeegyada sooshalka iyo caafimaadka

Marka aad meel dan ka leedahay isticmaal af-shareerka. Kala sii heshii booqashadaada isbitaalada iyo goobaha daryeelka wakhti hore.



Safridda

Marka aad waddanka gudihiisa ku safrayso ilaali hagitaanadda caafimaadka iyo badbaadada. Haddii ad u safartay waddamo la xadeeyay, waa in aad raacdaa hagitaanadda karaantiilka. Haddii ad safrayso, adiga oo caafimaad qaba oo kaligaata safar.

Soo dajiso koronavilkku
www.koronavilkku.fi